

Xaashida Xaqiiqda - Amarka Socda ee Badqabka Dugsiga Bulshada

Waa maxay Amarka Socda ee Badqabka Dugsiga Bulshada?

Dadka qaar, sida maamulayaasha iyo Waaxda shaqaalaha Tababarka iyo Waxbarashada, ayaa loogu yeeraa 'shakhsiyaadka fasaxan'. Waxay u leeyihiin awood inay sameeyaan Amaro kuu dejinaya sharciyo aad raacdo marka aad tagayso ama ka qeybgalayso dugsiga.

Amarka wuxuu kaa joojin karaa inaad gasho ama aad joogto garoomada dugsiga ama goobaha kale ee meesha ay hawlaha ka dhacaan. Amarka waxaa laga yabaa inuu kuu sheegayo inaan lagu oggolayn inaad dadka qaar kula dhaqanto si gaar ah, waqtiyada qaar, dugsiyada ama goobaha kale halkaas oo ay ka dhacdo hawlaha dugsiga. Amarka waxaa ku jiri kara xaalado gaar ah sida goorta waqtiyada, ama meelaha aagaga, Amarka uusan khuseyn.

Waxaa lagu siiyey Amarkan si ay macalimiinta, ardayda iyo dadka kale ee dugsiga jooga ay u dareemaan badqab. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Amarada Badqabka Dugsiga Bulshada ayaa laga heli karaa halkaan. Waxaad ka daawan kartaa muuqaal halkaan si uu kaaga caawiyo inaad fahamto waxaa Amarada Badqabka Dugsiga Bulshada ay sameeyaan.

Ilaa intee la'eg ayuu Amarka jirayaa?

Amarka ayaa sidoo kale kuu sheegaya inta ay sharciyaddan jiri doonaan. Waqtiga ugu dheer ay sii jiri karaan waa ilaa 12 bilood.

Sideen ugu sheegaa dugsiga inaan ku raacin Amarkan la sameeyey?

Ka hor qofka loo oggolaaday intuuusan sameyn Amarkan, waa inay ku ogeysiiyaan inay ka fakarayaan wax ku saabsan sameeynta Amarka iyo sababta ay uga fakarayaan inay sameeyn doonaan Amar. Waxaad sameeyn kartaa 'usoo gudbin' qofka loo oggolaaday si aad u sharraxdo sababta aad qaab gooni ugu dhaqantay, sida ay u sameeyn doonto adiga iyo ilmahaaga ama wax walba oo ay u baahan yihiin inay ogaadaan si ay u go'aansan karaan haddii ay Amarka sameeynayaan iyo haddii kale. Tusaale ahaan, waxaad u baahan kartaa inaad dugsiga u sheegto in ilmahaaga uu nafo yahay sidaa darteed waxay sameeyn doonaan qabanqaabo ay ku xaqiijin karaan inaad sii wadi karto inaad ka caawiso inay aadaan dugsiga.

Waxaad haysataa 7 maalmood si aad u sameeyso soo gudbinta kadib markii uu kuu sheego qofka loo oggolaaday inay fakarayaan wax ku saabsan sameeynta Amarka. Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa waqti badan si aad u sameeyso soo gudbin haddii aad u baahan tahay.

U soo gudbinta qoran ayaa noqon karta iimayl ama warqad oo ku socota qofka loo oggolyahay. Waxaad isticmaali kartaa shaababka ku jira websaydka Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka halkaan.

Haddii aadan rabin inaad soo gudbiso qoraal, waxaad weydiisan kartaa inaad bixiso soo gudbinta hadalka taa badalkeeda. Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa qof inuu kuu sameeyo soo gudbinta, sida qofka taageerada naafada ah ama turjumaan.

Haddii ilmaheyga dugsiga joogaan, maxaa ku dhacaya iyaga hadda oo ay tahay inaan raaco Amarka Socda?

Dugsigaaga wuxuu si taxadar leh ooga fakaray wax ku saabsan sida Amarka uu saameyn doono ilmahaaga iyo sida aad u daryeelayso. Amarka micnihiisu ma ahan inuu kaa joojiyo inaad daryeesho iyaga ama inaad ku lug yeelato waxbarashdooda.

Dugsigaaga wuxuu ku siin doonaa 'Helida Baratakoolka iyo Xiriirada' sida ugu dhaqsiyaha badan kadib markii Amarka lagu siiyo. Tani waxay dejin doontaa:

- Sida laguugu sheegi karo wax ku saabsan waxbarashada canugaaga
- Sida ilmahaaga ku sii wadi karo inuu aado dugsiga ama si badqab ah ooga qeybgalo hawlaha dugsiga
- Waxa ay sameyn doonaan si ay u xaqiijiyaan in ilmahaaga la taageero oona la xanaaneeyo.

Maxaa dhacaya haddii aan raacin Amarka?

Haddii aadan raacin sharciyadda lagu dejiyay Amarka, dugsiga waxaa uu isticmaali karaa Maxkamadda Garsoorka si lagu raacsiiyo Amarka.

Haddii Maxkamadda Garsoorka ay kugu hesho khalad ah inaad raacin Amarka, waxaa laga yaabaa:

- inay kaaga baahdaan inaad bixiso ganaax
- inay kaaga baahdaan inaad u hogaansato Amarka
- inay kaaga baahdaan inaad qaado tallaabo gaar ah si aad ugu hogaansanto Amarka
- inay kaaga baahdaan inaad sameeyso waxwalba oo kale ay Maxkamaddu u maleeyso inay saxan tahay.

Ma lagu xiri doono, mana heli doontid diiwaanka dambiga ama ganaaxa dambiga ee loogu talo galay inaad raacin Amarka.

Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo amarka in la beddelo?

Haddii aad rabto sharciyada sida ay isugu xigaan in la saaro ama beddelo, waxaad weydiin kartaa qof loo oggolaaday kaas oo amaray inuu sameeyo isbeddeladan. Haddii qofka la oggolaaday uu oggolaado, waxaa laga rabaa inay ku siiyaan nuqulka qoraalka amarka la beddelay. Haddii ay diidaan, waxaa laga rabaa inay raacaan shuruudo isku mid ah marka la sameeyo amarka socda.

Haddii qofka la oggolaaday uu rabo inuu ku daro sharciyo cusub amarka, waxaa laga rabaa inay raacaan shuruudaha isku mid ah marka la sameeynayo amarka socda.

Maxaa dhacaya haddii aan rabo inaan racfaan ka qaato Amarka?

Waxaad codsan kartaa inaad racfaan ka qaadato Amarka wixii ah sababaha socda:

- Haddii aad oggolaanin Amarka la sameeyey ee adiga kaa dhanka ah.
- Haddii aad weydiisay qofka loo oggolaaday inuu wax ka beddelo Amarka, laakiin ay diideen, adigana aadan ku faraxsaneyn go'aankaan.
- Haddii qofka loo oggolaaday beddelo Amarka, adigana aadan ku faraxsaneyn go'aankaan.
- Haddii qofka loo oggolaaday uu go'aan ku gaaro inuusan joojinin amarka, adigana aadan ku faraxsaneyn go'aankaan.

Go'aanka qiimeynta guddaha ayaa qaadan kara 28 maalmood laga bilaabo waqtiga codsigaaga loo diray maamulaha. Waqtigan waxaa loo isticmaalaa in si taxadar leh loogu qiimeeyo sababaha ka dambeeya Amarka lagugu sameeyey iyo sababaha lagu bixiyey soo gudbintaada.

Qiimeeyaha guddaha ayaa isbedello ku sameeyn kara Amarka, joojin kara Amarka ama midkoodna ma sameeynaayo. Marka go'aan la gaaro, waxaa laguugu soo ogeysiin doonaa iimayl iyo/ama boostada waxaadna heli doontaa nuqulka sababaha natiijada qiimeynta guddaha si ay kaaga caawiso inaad fahamto go'aanka la gaaray.

Haddii aadan ku faraxsanayn natiijooyinka qiimeynta guddaha, waxaad racfaan ka qaadan kartaa Maxkamada Maamulka iyo Rayidka ee Victoria. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo tani ku saabsan Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka [halkaan](#).

Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo fasire/turjumaan ama taageero kale?

Haddii aad u baahan tahay fasire, turjumaan ama taageerada qofka, waxaad u sheegi kartaa maamulaha dugsiga kaas oo kaa caawin kara inaad taageero hesho.

Haddii ilmahagaagu ay dhigtaan dugsiga dowladda, waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka xafiiska gobolka wixii taageero dheeraad ah.

<p>Waqooyi Bari Victoria</p> <p>Taleefoonka: 1300 333 231</p> <p>Iimayl: nevr@education.vic.gov.au</p>	<p>Waqooyi Galbeed Victoria</p> <p>Taleefoonka: 1300 338 691</p> <p>Iimayl: nwvr@education.vic.gov.au</p>
<p>Koonfurta Beri ee Victoria</p> <p>Taleefoonka: 1300 338 738</p> <p>Iimayl: sevr@education.vic.gov.au</p>	<p>Koonfur Galbeed Victoria</p> <p>Taleefoonka: 1300 333 232</p> <p>Iimayl: swvr@education.vic.gov.au</p>

Ka waran haddii aan rabo macluumaad dheeraad ah?

Waxaad tagi kartaa websaydka Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka [halkaan](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.